



Maribyrnong City Council

Xaashida Macluumaadka  
Xaalladaha Degdegta



Somali



**Adeegyada Xaalladaha Degdegta oo Caawimaya Bulshadeena**

Markii waxyaalla degdeg ahi dhacaan wac 000

Ingiriis ku dheh BOOLIIS, DAB DAMIS ama AMBALANSI

Haddii aad u baahan tahay turjubaan afkaaga ku sheeg Ingiriis iyo turjubaan (interpreter)

Wax yar ayaad sugaysaa – HA DHIGIN

Turjubaan ayaa ku weydiin doona xaalladaada degdegta ah

Inta lagu waraysanayo jawaabahaaga waxaa la siinayaa ahmiyada ugu saraysa

Dhegayso su'aallaha iyo jawaabaha sida ugu fiican

U hadal si degan, waadax ah korna hadalka u dheh. Is deji

Waxa ugu horeeya oo lagu weydiin doono intaan wax kale lagu weydiin waa:

Xaggee wax ka dhaceen?

Waa maxay wadada kuugu dhowi?

Maxaa dhacay?

Diyaar u noqo inaad bixiso NAMBAR LAGAA SOO WACO



## BOOLIIS

MARKA LA WACAYO:

- Marka qof noloshiisu khatar ku jirto
- Marka shil gaari dhaco
- Dambi laga shakisan yahay uu socdo.

XAALLADA DEGDEGTA

- Dembiga ha faragashan
- Qor faahfaahinta loo baahan yahay

## DAB DAMISKA

MARKA LA WACAYO:

- Markaad aragto dab ama qaac
- Markuu qayliyo alaarmigu
- Markaad ka uriso qaac gudaha iyo agagaaraha

XAALLADA DEGDEGTA:

- Hubi khataraha
- Had iyo jeer hayso dab damiye iyo buste
- Yeello qorshe dab ka cararid

**\*\*Had iyo jeer waa in alaarmigaaga dabku shaqaynayaa\*\***

## AMBALANSI

MARKA LA WACAYO:

- Markuu jiro xannuun daran oo laabta ah
- Qofku miyir beello
- Qofka neefsigu ku adag yahay
- Dhaco, dhaawacmo ama shil dhaco

XAALLADA DEGDEGTA:

- Hubi khataraha
- Deji bukaanka
- Ha siin cunto ama cabitaan
- Wax kasta u sheeg ambalansida

## SES

**\*\*WAC 132 500\*\***

MARKA LA WACAYO:

- Marka geed soo dhaco
- Marka saqafku soo dhaco
- Marka biyaha daadku kor u kacayaan

XAALLADA DEGDEGTA:

- Hubi khataraha
- Gudbi macluumaadka ugu badan oo aad bixin karto

Nambarka gurigaygu waa: \_\_\_\_\_  
 Magaca wadadaydu waa: \_\_\_\_\_  
 Xaafadaydu waa: \_\_\_\_\_  
 Telefoonkayga nambarkiisu waa: \_\_\_\_\_